QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su'aalaha badanaa la isweydiiyo ee ku saabsan tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay 12 illaa 17-sanno jiryada

(*La cusbooneysiiyay 5-25-2021*)

Carruurta yar, da’da 12 iyo ka weyn ayaa u qalma inay helaan tallaalka Pfizer (Pfizer BioNTech) ee COVID-19

S1: Halkee ayay dadka ka heli karaan tallaalka Pfizer?

J1: Booqo websaydka OHA, Sida looga Helo Tallaalka COVID-19 gudaha Oregon, ama websaydka CDC, VaccineFinder.org oo wixii warbixin ee ku saabsan sida loo helo balanta tallaalka ama loo helaa goobta tallaalka oo aan laheyn balanta qaabilaadaha. Waxaad sidoo kale ka balansan kartaa adiga oo soo wacayo lambarka taleefonka ee websaydka bixiyaha tallaalka ama soo wacayo 211 (1-866-698-6155).

Intaas waxaa dheer, bulshooyin badan ayaa ku bixinaya tallaalka dugsiyada. Weydii ama ka raadi warbixin dugsiyada oo ka fiiri websaydka dugsiga degmada ama dugsiga wixii tallaal oo la heli karo.

Ma ahan in goobaha tallaalka oo dhan ay aqoonsadaan tallaalkee la heli karaa. Qariirada raadiyaha tallaalka OHA iyo VaccineFinder.org ee CDC ayaa kuu ogolaado inaad ku raadisid nooca tallaalka. Aalada raadiyaha tallaalka OHA ayaa sidoo kale kuu ogolaato raadinta goobaha tallaalka ee aan ogolaansho uga baahneyn waaladiinta ama masuulada oo dhalinyarada da’aha 15 illaa 17.

OHA waxay balaarisay helitaanka tallaalka Pfizer oo gobolka oo dhan ah markaas qof kasta oo doonaya inuu is tallaalo wuu heli karaa tallaalka iyaga loo ansixiyay.

S2: Miyay wax ka badan hal qof balansan karaa isla waqtiga?

J2: Qaar ka mid ah goobaha tallaalka waxay u baahanyihiin balan, iup waalidka ama masuulka wuxuu balansan karaa qeybo badan oo isku waqti ah, oo loogu tallogalay hal qof walboo u qalmo. Balansiga waxaa lagu sameyn karaa dhinaca websaydka bixiyaha ama adiga oo soo wacayo lambarka taleefonka ee websaydka bixiyaha tallaalka 211 (1-866-698-6155). Booqo bogga mareegta OHA Sida Looga Helo COVID-19 gudaha Oregon, ama mareegta CDC, VaccineFinder.org si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo qabsado ballan tallaal.

S3: Waa maxay saameynada caafimaadka ee dhalinyarada?

J3: Saameynada caafimaadka suurtogalka ah kadib helitaanka tallaalka waa isku midka dhalinyarada sida ay yihiin dadka kale. Dadka badankooda waxay xoogaa xanuun ka dareemaan goobta laga duray. Daal iyo madax-xanuun ayaa caadi ah. Waxyaabaha aan caadiga ahayn waa murqo-xanuun, qarqaryo, kalagoys xanuun, matag, ama qandho. Tani waxaa ka mid ah falcelinada waa caadi oo jawaab u ah helitaanka tallaalka. Saameynada caafimaadka waxay aad ugu caadi yihiin dhalinyarada iyo da'yarta badelkii dadka weyn. Intooda badan way baaba'aan maalin ama labo kadib.

S4: Miyuu canugeyga ka helaa tallaal dugsiga?

J4: Bulshooyin badan waxay ku bixinayaan tallaal dugsiga. Waxaad sidoo kale ka fiirin kartaa websaydka degmada ama dugsiga wixii warbixin dheeraad ah.

S5: Miyay dhalinyarada qaadan karaan tallaalka Moderna ama Johnson & Johnson?

J5: Maya.Hadeer la joogo tallaalka kaliya ee ka helay ansixinta isticmaalka degdega ah Maamulka Cuntada iyo Daawada (FDA) oo isticmaalka dadka ka hooseeyo da'da 18 waa tallaalka Pfizer (ama tallaalka Pfizer BioNTech). Dhalinyarada, waalidka ama masuulada waxay u baahanyihiin inay raadiyaan adeegyada balanta ama imaanshaha ee goobaha bixiyaa tallaalka Pfizer.

S6: Goorma ayaa tallaalada loo ansixinayaa kooxda da'da 2-11?

J6: Ma garanayno. Tallaalada waxaa u ansixiya isticmaalka degdega ah FDA oo xigta dib u eegida codsiga ee soo saaraha. Meeshaan markay joogto, ma jiraan soo saarayaal kale ee codsaday ansixinta isticmaalka degdega oo dadka ka hooseeyo 12 sanno jirka. Soo saarayaasha waxay tijaabinayaan labadaba tallaalada Pfizer iyo Moderna ee dadka ka hooseeyo da'da 12 oo waxay codsan karaan ansixinta isticmaalka da'da kooxdaan ee deyrta 2021.

S7: Miyay waaladiinta ama masuulada u baahanyihiin inay la jiraadaan carruurtooda oo balantab tallaalkoodat?

J7: Siduu qabo sharciga Oregon, carruurta aan qaangaarin ee jira 15 iyo ka weyn ayaa laga yaabaa inay bixiyaan oggolaanshaha ay ku helayaan daaweynta caafimaadka, oo ay ku jiraan tallaalada, marka uu bixinayo dhakhtarka, kaaliyaha dhakhtarka, dhakhtarka mindaawaadka, kalkaaliyaha caafimaad, dhakhtarka ilkaha ama dhakhtarka indhaha, ama xirfadlayaasha kale ee ku shaqeeya shatiga bixiyeyaashaan. Sida waafaqsan hagida OHA, bixiyayaashaan tallaalka COVID-19 ee diiwaangashan laga yaabo inuu u baahdo ogolaansho ka imaanayo waalidka ama masuulka si loo tallaalo qof da'da 15, 16, or 17. Iyada oo ay la jirto ogolaanshaha farmashiyada, inta badan goobaha meesha tallaalada COVID-19 laga bixiyo waxay leeyihiin kormeerida bixiyaha caafimaadka ee liiskaan.

Ogolaanshaha waalidka ama masuulka waalooga baahanyahay in lagu duro dadka 12-14 sanno jirka ah, laakin sharuuda ogolaanshaha waalidka ama masuulka si muhiim micnaheeda uma ahan in waalidka ama masuulka ay tahay inuu raaco

dhalinyarada si ay u helaan tallaalka. Ogolaansho qoran ayaa la heli karaa xili hore. Waa inaad la xiriirtaa bixiyaha tallaalka ama rugta tallaalka si aad u go'aansatid haddii waalidka ama masuulka ay tahay inuu xaadir ahaado.

Bixiyeyaasha siinaya tallaaladda COVID-19 waa inay ku cadeeyaan websaydkooda, daabacaan qoraalada iyo waqtiga balanta tallaalka la sameeyay nooca ogolaanshaha ee ka imaanayo waalidka ama masuulka ee looga baahanyahay iyo haddii waalidka ama masuulka ay tahay inuu xaadir ku ahaado balanta tallaalka.

S8: Maxay tahay in dadka ogaadaan ka hor inta aysan imaanin tallaalka?

J8: **Tallaalka Pfizer waa mid badqab ah oo waxtar leh.** FDA waxay u baahan yihiin tijaabinta badqabka oo adag ka hor inta aysan ansixinin wax tallaal ah oo isticmaalka degdega ah. Tallaalka COVID-19 ee ka socda Pfizer waxaa lagu tijaabiyay kumanaan kaqeybgaleyaal daraasad ah wuxuuna soo saaray xog ku filan oo lagu qanciyo FDA in tallaalku yahay mid ammaan ah oo wax ku ool ah.

Tallaalka COVID-19 waa lacag la'aan. Tallaalada waxaad lagu bixiyaa lacag la'aan ah. Uuma baahnid caymis caafimaad. Haddii aad leedahay caymis caafimaad, bixiyayaasha tallaalku waxa dhici karta inay caymiskaaga ku dallacaan khidmadda siinta tallaalka. Tani waxay ka dhigan tahay in lagu weydiin karo macluumaadkaaga caymiska markaad qaadaneyso tallaalka COVID. Haddii aad leedahay caymiska caafimaadka, hubi inaad la imaatid kaarka caymiskaaga balantaada.

Caddeyn u-qalmitaan ama aqoonsi looma baahna. Bixiyayaasha tallaalka waxay weydiisan karaan cadeynta u qalmida, aqoonsiga, lambarka amniga bulshada, ama warbixinta caymiska caafimaadka. Adiga ayay kuu taalaa haddii aad bixisid warbixintaas, oo **loogama** baahno inaad ku heshid tallaalka. Bixiyeyaasha tallaalka waxay sidoo kale ku warsan karaan inaad ku nooshahay Oregon ama nooca shaqada aad qabato. Bixiyaha tallaalka waa inuusan ugu diidin inuu qof siiyo tallaalka iyadoo ku saleysan jawaabahooda su'aalahaan.

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.